THE OHIO STATE UNIVERSITY Medical Center

# Dining Choices

In an effort to make your visit as pleasant as possible we have developed this com-prehensive list of dining options. Whether you are hungry for Chinese or an old fashioned hamburger, we've got it for you, Many dining options are available within OSU Medical Center buildings and some are just a short walk away.

**Seasons Cafe**

- Located on the first floor of Rhodes Hall
- Selections include a salad bar, daily specials on the hot entree station, desserts, deli sandwiches, grilled sandwiches, wraps, snack foods, bottled and fountain beverages. Special meal events are planned most months.
- Hours of operation
  Weekdays: 6:30 a.m. to 7 p.m.
  Weekends and Holidays: 7 a.m. to 6:30 p.m.

**Wendy's Old Fashioned Hamburgers**

- Located on the ground level between Doan Hall and James Cancer Hospital
- Wendy's offers salads, hamburger and chicken sandwiches, chili, fries, children's meals and fountain beverages.
- Hours of operation
  Daily: 10 a.m. to 3 a.m.
  Holiday hours vary

**Express Oasis**

- Located in the corridor between the 12 Avenue Parking Garage connector and the Doan Hall 1st floor hallway
- Selections include assorted coffees, pastries and other beverages
- Hours of operation
  Weekdays: 6 a.m. to 7 p.m.
  Weekends: 6 a.m. to 6 p.m. Holiday hours vary

**Skyward Concessions**

- 2 locations on the OSU Main Campus
- Outdoor mobile food cart offering hot sandwiches including gyros and bratwurst, chips, snacks and beverages,
- Hours of operation
  Weekdays: 11 a.m. to 2 p.m.

**Vending Machines**

- Located throughout the Medical Center for your convenience. Available 24 hours a day, seven days a week, the vending machines offer snacks, beverages and entrees in larger areas. Change machines are also provided.

**Hospitals Garage Cafe**

- Located in the Hospitals Garage, next to the Ross Heart Hospital.
- A variety of restaurants such as Wall Street Deli, Bonjour Cafe, Maurizo's and Mark Pi's are available.
- Hours vary by restaurant.

**Cheryl & Co.**

- Located in the corridor between the 12 Avenue Parking Garage connector and the Doan Hall 1st floor hallway
- Offers fresh baked desserts (cookies, brownies, cakes - by the slice or whole; cookie dough in containers and confectionary gift items).
- Hours of operation
  Weekdays: 7 a.m. to 8 p.m.
  Weekends: 10 a.m. to 6 p.m.

**Scarlet Ribbon Gift Shop**

- Located in the Rhodes Hall Lobby
- Offers a variety of candy, snacks and beverages
- Hours of operation
  Weekdays: 8 a.m. to 8 p.m.
  Weekends: 10:30 a.m. to 7 p.m.

**The Marketplace**

- Located at 1578 Neil Avenue
- Offers many food options ranging from bagels and pastries, soups, salads and sandwiches, to made-to-order pizza and stir-fry. Also, many drink options are available such as fresh coffee and espresso.
- Hours vary by restaurant

**Mirror Lake Cafe**

- Located at 1760 Neil Avenue.
- Offers freshly made-to-order subs, pizzas and smoothies. Ready-to-go salads, bagels and sweets. Soup and food specials daily.
- Hours of operation
  Weekdays: 7 a.m. to 2 a.m.
  Weekends: 2:30 p.m. to 2 a.m.

For other restaurants that are within a short driving distance, please visit the information desk.

*At the Ohio State University Medical Center we're committed to creating the future of medicine to improve people's lives. That's why all OSU Medical Center locations - inside and outside - are tobacco-free. If you use tobacco and are ready to quit, call The James Kick-It program at* 674-293-642S *or the Ohio Tobacco QuitLine at 1-800-QuitNow.*

***Updated on 1/12/07***

The Ohio State University Medical Center

# Dining Choices (Somalian)

## Doorashada Goobaha Cuntada

Waxa aannu soo saarnay liiskan ama taxanahan dhameystiran ee ku saabsan doorashada goobaha cuntada. Taasoo ay ka mid tahay dadaalka aannu ugu jirno in aannu ka dhigno booqashadaada mid raaxo leh intii suurogal ah. Sidaa daraadeed, haddii ay baahi kuu hayso cuntada Shiinaha ama haambeerger asal ah, waannu kuu haynnaa. Goobo badan oo wax laga cuno ayaa laga helaa gudaha dhismeyaasha cisbitaalka OSU Medical Center, qaarkoodna waxay kuu jiraan socod gaaban oo kaliya.

**Seasons Cafe**

- Waxay ku taallaa dabaqa koobaad ee Rhodes Hall
- Waxyaabaha la kala dooran karo waxa mid ah qaybta saladhka/ansalaatada, doorashada cuntada maalinta ee khaaska ah oo laga helo qaybta af-bilawga kulul, macmacaan, saanwijyo qabow, saanwijyo la dubay, cunto duub ah, cabitaanno dhalo ku jira iyo kuwo laguu shubayo. Munaasabado leh cunto gaar ah ayaa u qorsheysan bilaha intooda badan.
- Saacadaha furnaanta
  Maalmaha shaqada: 6:30 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.
  Maalmaha Sabtida iyo Axadda iyo Ciidaha: 7 subaxnimo ilaa 6:30 galabnimo.

**Wendy iyo Hambeergarkeega ah Noocii Hore**

- Waxay ku taallaa heerka dhulka ee u dhexeeya Doan Hall iyo James Cancer Hospital
- Wendy waxa laga helaa saladh/ansalaato, hambeergar iyo saanwijyo ah digaag, suugo basbaas leh, bataati/baradho shiilan, cuntada carruurta iyo cabitaanno laguu shubayo.
- Saacadaha Furnaanta
  Maalin kasta: 10 subaxnimo ilaa 3 subaxnimo
  Saacadaha maalmaha ciidaha way kala duwan yihiin

**Express Oasis**

- Waxay ku taallaa inta u dhexeysa meesha laga tago baarkinka 12 Avenue Parking Garage iyo dabaqa 1-aad ee Doan Hall
- Cuntooyinka la kala dooran karo waxa ka mid ah noocyo kala duwan oo kafee ah, macmacaan iyo cabitaanno kale
- Saacadaha Furnaanta
  Maalmaha shaqada: 6 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.
  Sabtida iyo Axadda: 6 subaxnimo ilaa 6 galabnimo.
  Saacadaha maalmaha ciidaha way kala duwan yihiin

**Skyward Concessions**

- Waa 2 goobood oo ku yaalla OSU Main Campus
- Gaadhi-gacan cunto la wareega oo laga helo saanwijyo kulul oo ay ka mid yihiin “gyros” iyo hilib doofaar oo kiisheysan (bratwurst), jibis, cunto fudud iyo cabitaanno.
- Saacadaha Furnaanta
  Maalmaha shaqada: 11 subaxnimo ilaa 2 galabnimo.

**Mishiinada Iibinta**

- Waxay ku yaallaan goobo ku baahsan Medical Center si laguugu fududeeyo iibsashada. Waxa wax laga iibsan karaa 24-ka saacadood, todobada beri ee todobaadka; waxa mishiinnada iibinta laga helaa goobaha waaweyn. Cuntooyinka aad ka iibsan karto mashiinadaa waxaa ka mid ah cunto fudud, cabitaanno iyo cunto af-bilaw ah. Waxa kale oo mashiinada cuntada laga ag helaa mishiinno kuu sarrifiya ama kuu beddelaya lacagta.

**Hospitals Garage Cafe**

- Waxay ku taallaa Geerashka Cisbitaallada (Hospitals Garage), ee ku xiga Ross Heart Hospital.
- Noocyo kala duwan oo ah makhaayado sida Wall Street Deli, Bonjour Cafe, Maurizo's iyo Mark Pi ayaa laga helaa.
- Saacadaha way ku kala duwan yihiin makhaayaduhu.

**Cheryl & Co.**

- Waxay ku taallaa aagga dhexda ah ee u dhexeeya halka laga tago baarkinka 12 Avenue Parking Garage iyo dabaqa 1-aad ee Doan Hall
- Waxa laga helaa macmacaan dhawaan la sameeyay (buskud, macmacaan shukulaato leh, keeg/doolshe – jeex ama isaga oo dhan; buskudyo ku jira sanduuq/daasad iyo macmacaan hadiyad noqon kara).
- Saacadaha Furnaanta
  Maalmaha shaqada: 7 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
  Sabtida iyo Axadda: 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo.

**Scarlet Ribbon Gift Shop (Dukaanka Hadiyadda)**

- Waxa uu ku yaallaa Rhodes Hall Lobby
- Waxa laga helaa noocyo kala duwan oo ah nacnac, cunto fudud iyo cabitaanno
- Saacadaha Furnaanta
  Maalmaha shaqada: 8 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
  Sabtida iyo Axadda: 10:30 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo.

**The Marketplace**

- Waxay ku taallaa 1578 Neil Avenue
- Waxa laga helaa cunto kala duwan oo isugu jirta rootida loo yaqaano "bagel" iyo macmacaan, maraqyo, saladh/ansalaato iyo saanwijyo, biitsa la dalbanayo iyo cunta la shiilayo. Waxa sidoo kale laga helaa cabitaanno badan oo kala duwan sida kafee laguu sameynayo iyo kafee ah "espresso."
- Saacadaha way ku kala duwan yihiin makhaayaduhu

**Mirror Lake Cafe**

- Waxay ku taallaa 1760 Neil Avenue.
- Waxa laga helaa saanwijyada loo yaqaanno "subs" oo isla markaa dalab laguugu sameyno, biitsa iyo "smoothies." Saladh/ansalaato, rootida "bagel" iyo macmacaan diyaar ah oo la qaadan karo. Maalin kasta waxa jira maraq iyo cunto gaar ah.
- Saacadaha Furnaanta
  Maalmaha shaqada: 7 subaxnimo ilaa 2 subaxnimo
  Sabtida iyo Axadda: 2:30 galabnimo ilaa 2 subaxnimo

Si aad u ogaatid makhaayadaha kale ee baabuur-wadis aan dheereyn lagu tagi karo, fadlan booqo miiska warka.

*Haddii aannu nahay Ohio State University Medical Center waxa aannu u guntannay in aannu mustaqbalka daweynta ka dhigno mid lagu hagaajinayo nolosha dadka. Sababtaa daraadeed ayaa dhammaan goobaha OSU Medical Center– gudaha iyo dibaddaba – sigaar ama tubaako mamnuuc uga yihiin. Haddii aad isticmaashid sigaar ama tubaako oo aad diyaar u tahay inaad iska joojisid, wac barnaamijka The James Kick-It program oo lambarkiisu yahay* 614-293-6428 *Khadka Iska-joojinta Sigaarka iyo Tubaakada ee Ohio (Ohio Tobacco Quit Line) oo ah 1-800-QUIT-NOW.*